AMARKA FULLINTA EE LAMBARIKIISU YAHAY. 20-16

SII WADIDDA SHAQADA DAWLADDA: FARIDDA TALLAABOOYINKA DARUURIGA AH SI LOO HUBIYO KULAMO DADWAYNE OO BADBAADO LEH IYO SII SOCOSHADA HAWLGALLADA DAWLADAHA HOOSE MUDDADA LAGU JIRO DILLAACA CORONAVIRUS (COVID-19)

Bishii Febraayo 28, 2020, waxaan magacaabay Kooxda Gurmadka Deg dega ah Fayraska Korono ee Gobolka Oregan.

Bishii Febraayo 29, 2020, Waaxda Adeegyada Aadanaha waxay soo saartay tilmaamo adag, oo xaddidey booqashada xarumaha daryeelka la isugu keenay, oo ay ku jiraan guryaha daryeelka.

Bishii Maarso 2, 2020, Barasaabka wuxuu diyaar gareeyay Xarunta Xiriirinta Xaalada Degdega.

Maarso 8, 2020, waxaan soosaaray baaq xaalad degdeg ah anoo cuskanaya ORS 401.165 *et seq*. taasi oo ay ugu wacan tahay halista ku aaddan caafimaadka dadwaynaha ee caabuqa coronavirus (COVID-19).

Markay ahayd Maarso 12, 2020, waxaan mamnuucay isu imaatinka 250 qof ama in kabadan, waxaana ku dhawaaqay xiritaanka gobolka oo dhan ee iskuulada Oregon K-12 laga bilaabo Maarso 16, 2020, ilaa Maarso 31, 2020.

Maarso 13, 2020, Madaxwaynaha Maraykanka ayaa ku dhawaaqay in COVID-19 yahay xaalad degdeg ah oo qaran.

Xiliga Maarso 17, 2020, waxaan mamnuucay kulamada 25 ama dad badan, laga mamnuucay ku isticmaalka goobta cuntada iyo cabitaanka ee aasaasyada cuntada ee gobolka oo dhan, oo la kordhiyay xiritaanada dugsiga illaa Abriil 28, 2020. Waxaan sidoo kale ku dhiirigeliyey dhamaan ganacsatada inaysan ku hoos imaanaynin mamnuucida in la dhaqan geliyo borotokoolka kala fogaanta bulshada.

Markay ahayd Maarso 18, 2020, waxaan hakiyay howlihii waxbarista ee shaqsiga ahaa ee xarumaha waxbarashada sare ilaa Abriil 28, 2020.

Xiliga Maarso 22, 2020, waxaan ku soo rogay mamnuucid ku meelgaar ah oo ka guurinada deegaanka oo sabab la xiriirto kiro bixin la'aanta, mamnuucayo fullinta sharciga oo u adeegida, gaarsiinta, ama ku dhaqmayo ogeysiin walba, amarka ama

AMARKA FULLINTA EE LAMBARIKIISU YAHAY. 20-16
BOGGA LABO

amarka qoran ee ka joojinta kireysiga, la xiriirto ka guurinada deegaanka oo lacag bixin la'aan ah.

Xiliga Maarso 23, 2020, waxaan ku amray reer Oregon inay "Joogaan Guriga, Badbaadiyaan Nololo," ku hagayo shaqsiyaadka inay guriga joogaan illaa inta ugu badan oo suurtogalka ah, ku amrayo xiritaanka ganacsiyada tafaariiqda la gaareeyay, u baahan tallaabooyinka kala fogaanshaha bulshada ee xarumaha bulshada kale iyo xarumaha gaarka ah, oo ku soo rogayo sharuudaha aagaga banaanka iyo xarumaha daryeelka carruurta shatiyeysan.

Abriil 1, 2020, waxaan soo rogay in si kumeel gaar ah loo hakiyo joojinta heshiisyada kirada iyo guryo ka saaridda dadka guryaha deggan marka ay lacag bixin waayaan, si loo hubiyo dadka inayna guryaha ka soo bixin ilaa inta ugu badan ee suurtogal ah, iyo si loo hubiyo bixinta alaabta iyo adeegyada daruuriga ah inta xaaladdan degdegga ah lagu jiro.

Abriil 8, 2020, waxaan ku dhawaaqay in xiritaanada dugsiyada iyo hakinta hawlaha waxbarasho ee la isku imanayo ee macaahidda waxbarashada sare loo kordhin doono ilaa dhammaadka teeramka waxbarasho ee wakhtigan iyo sanad dugsiyeedka.

COVID-19 wuxuu keeni karaa cudur neefmareenka ku dhaca oo horseedaya xanuun halis ah ama dhimasho. Ururka Caafimaadka Adduunku wuxuu u tixgaliyey COVID-19 mid adduunka wada gaaray. COVID-19 wuxuu dadka isugu gudbaa qufaca, hindhisada, istaabashada, oo ay ku jirto taabashada meel fayraska leh kadibna inaad taabato afka, sanka, ama indhaha.

Saraakiisha caafimaadka gobolka iyo deegaanku waxay sheegeen in fayrasku uu bulshada dhex wareegayo lana filayo in tirada uu haleelay kordhaan. Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurka (CDC) ee Maraykanka waxay sheegeen in COVID-19 uu aad u gudbo marka qofku astaamaha leeyahay, laakiin sidoo kale uu gudbi karo kahor astaamuhu inayna muuqan. CDC waxay ku talisay tallaabooyin si loo xadido faafidda cudurka ee bulshada, oo ay kujirto xadidaad dhacdooyinka iyo kulamada ah.

Tirada kiisaska COVID-19 ayaa sii korodhay Oregon. Maarso 8, 2020, markii aan ku dhawaaqay xaalad degdeg ah, waxa jiray 14 kiis oo qiyaas ahaa ama la

xaqiijiyey Oregon. Ka bilow maanta, waxaa jiro ugu yaraan 1,663 kiis oo la xaqiijiyey iyo 58 dhimasho.

Muddo yar gudahood, COVID-19 si dhakhso ah ayuu u fiday. Si loo yareeyo faafitaanka COVID-19 gudaha Oregon, iyo si loo ilaaliyo caafimaadka iyo nolosha dadka reer Oregon, gaar ahaan kuwa halista ugu sarreeya leh, waxaan ogahay in dhaqangelinta degdeg ah ee tallaabooyin dheeri ah loo baahan yahay si loo ilaaliyo caafimaadka, badbaadada, iyo degganaanta maaliyadeed ee dhammaan dadka reer Oregon.

Inta lagu jiro xaaladdan degdegga ah, dawladaha gobolka iyo deegaanku waa inay sii wadaan hawlgalidda, bixiyaan adeegyada daruuriga ah, oo u qaataan go'aanno qaab caam ah oo daahfuran. Dawladuhu waa inay sidaas u sameeyaan si badbaado leh, oo waafaqsan amaradayda. Kaqaybqaadashada dadwaynuhu waxay daruuri u tahay shaqaynta dawladaheenna gobolka iyo deegaanka, laakiin in dadku si toos ah uga qaybgalaan kulamada waxay halis ku tahay caafimaadka dadwaynaha iyo badbaadada dadka reer Oregon, ilaa tallaabooyin habboon la qaado. Haddaba, inta lagu jiro xaaladdan degdegga ah, kulamada dadwaynaha waa in lagu qabto taleefanka, maqal iyo muuqaal, qaab elektaroonik ah ama qaabab kale oo la kala fog yahay, markasta oo ay suurtogal tahay, si aynu u ilaalino badbaadada dadka reer Oregon, una yarayno faafidda COVID-19. Sidaas oo kale, dawladaha hoose waa inay awoodaan inay u qabtaan kulamada miisaaniyadda qaab waafaqsan amaradayda guriga joog, si ay u dhammaystiri karaan hannaankooda miisaaniyadda ee soo socda una hubiyaan sii wadista gaarsiinta adeegyada dawladda ee daruuriga ah dadwaynaha.

HADDABA SIDAAS DARTEED, WAXAA HALKAAN LAGU JAHEEYAY OO LAGU AMRAY IN:

Sida ay dhigayaan ORS 433.441, ORS 401.168, ORS 401.175, ORS 401.188, iyo ORS 401.192, waxaan u soosaarayaa amarrada soo socda, kuwaasi oo u oggolaanaya dawladaha gobolka iyo deegaanka inay qaadaan tallaabooyinka daruuriga ah si ay u hubiyaan sii socoshada hawlgallada, kaqaybqaadashada dadwaynaha ee go'aan-qaadashada, iyo u bixinta adeegyada dawladda ee muhiimka ah qaab badbaado leh inta lagu jiro dillaacidda COVID-19:

AMARKA FULLINTA EE LAMBARIKIISU YAHAY. 20-16
BOGGA AFAR

1. Qeexdin. "Muddada xaaladda degdegga ah ee COVID-19" waxay ka dhigan tahay muddada uu gudaheega xaaladda degdegga ah ee COVID-19 ee uu ku baaqay Amarka Sare 20-03 uu dhaqangalay, oo ay kujiraan wixii korodh lagu sameeyey xaaladdaas degdegga ah.

2. Kulamada Dadwaynaha. Muddada lagu jiro xaaladda degdegga ah ee COVID-19:

   a. Guddida maamusha urur dawli ah (sida ku qeexan ORS 192.610(3) iyo (4)) waa inay ku qabsadaan kulmada iyo dhagaysiyada dadwaynaha taleefan, maqal iyo muuqaal, ama qaabab kale oo elektaroonik ah ama la kala fog yahay, markasta oo ay suurtogal tahay. Dhammaan kulamada iyo dhagaysiyada dadwaynaha ee lagu qabto taleefan, maqal iyo muuqaal, ama qaab kale oo elektaroonik ah ama la kala fog yahay, ururka dadwayne waa inuu diyaariyo qaab dadwaynuhu ay dhagaysan karaan ama si fogaan ah ay uga qaybgali karaan kulan ama dhagaysi dadwayne isla wakhtiga uu dhacayo, mana aha in ururka dadwaynuhu uu bixiyo goob dadwaynuhu iskugu yimaadaan si ay uga qaybgalaan kulanka ama dhagaysiga. Baaragaraafkani ma khuseeyo kulamada madaxda sare, sida ku qeexan ORS 192.610(2).

   b. Marka kulamada ama dhagaysiyada dadwayne ee ururka maamula urur dadwayne aan lagu qaban karin taleefan, maqal iyo muuqaal, ama qaabab kale oo elektaroonik ah ama la kala fog yahay sida uu dhigayo baaragaraafka 2(a) ee Amarka Sare, dadka kaqaybgalaya kulamadani waa inay joogteeyaan kala fogaanta bulshada ee habboon (lix fuudh ama ka badan u dhexeeyaan shakhsiyaadka), ilaa xadka ugu badan ee suurtogal ah.

   c. Wixii sharcigu dhigayo ama siyaasadi dhigayso ee ah in caddaynta kulan ama dhagaysi dadwayne in laga dhigto mid la isku yimaaddo ma khuseeyo haddii ururka dadwayne uu fursad u siinayo in caddaynta lagu gudbin karo taleefan, maqal iyo muuqaal, ama qaab kale oo elektaroonik ah ama la kala fog yahay, ama siinayo qaab loo gudbiyo caddaynta qoraalka ah, oo ay kujiraan iimeyl ama qaabab kale oo elektaroonik ah, oo ururka dadwayne u arki karaan inay wakhti ahaan habboon yihiin. Baaragaraafkani ma khuseeyo dhagaysiyada kiiska la is-hayo iyadoo la cuskanayo ORS cutubka

183.

d. Haddii aanu sharcigu dhigaynin, kooromka ururka maamula urur dadwayne iyo tirada xubnihiisa ee looga baahan yahay ansixinta xeer wuxuu ka kooban yahay badanka xubnihiisa, marka laga reebo kuwa awoodi waayey inay kaqaybgalaan xanuunka COVID-19 dartii.

3. Kulamada Miisaaniyadda Deegaanka. Muddada lagu jiro xaaladda degdegga ah ee COVID-19:

a. Wixii shuruud ah ee ay dhigayaan ORS 294.305 to 294.565, ama ORS 294.900 ilaa 294.930, si loo siiyo xubnaha dadwaynaha ama canshuur-bixiyayaasha fursad ay su'aalo ku waydiin karaan ama faallo kaga bixin karaan, ama ay ku hor iman karaan ama kula kulmi karaan, ama kaqaybgali karaan dhagaysiga, ha noqoto guddi miisaaniyadeed lagu aasaasay ORS 294.414 ama ORS 294.905, ama ururka maamul ee golaha deegaanka sida ku qeexan ORS 294.311) ama golaha dawladaha hoose (sida ku qeexan ORS 294.900), waxa lagu raalligalin karaa siinta hab ay ugaga qaybgalaan kulan xagga taleefanka, maqal iyo muuqaal, ama qaabab elektaroonik ah oo kale iyo sidoo siinta qaabab ay u gudbiyaan qoraallo, oo ay kujiraan iimayl ama qaabab kale oo elektaroonik ah, oo guddida ama ururka maamul uu u arki karo inay wakhtiga ilaalinayaan.

b. Daabacaadda wixii ogaysiis ah, guudmar ah, ama dokumenti kale ah ee uu dhigayo ORS 294.305 ilaa 294.565, ama ORS 294.900 ilaa 294.930, waxa lagu raalligalin karaa u soo dhigista ogaysiiska, guudmarka, ama dokumenti kale qaab caan ah internetka.

c. Haddii khatarta caafimaadka dadwaynaha ee kujirta xaaladda degdegga ah ee COVID-19, ama ku dhaqanka Amarka Sare ee la soosaaray iyadoo la raacayo ORS 401.165 ilaa 401.236 iyadoo la eegayo xaaladdaas degdegga ah, ay ku keenayso golaha deegaanka inay ku fashilmaan inay ku dhaqmaan ORS 294.305 ilaa 294.565 ama ORS 294.900 ilaa 294.930, markaa, si kastaba ha noqotee ORS 294.338(1) ama sharci kale oo kasta, golaha deegaanku wuxuu samayn karaa kharash galid macquul ah si ay u sii socdaan hawlgallada golaha deegaanku iyagoo adeegsanaya miisaaniyadda

jirta ama miisaaniyadda dhawaanta la ansixiyey, haddii ay wax ka tarayso wixii fashil ah ee ku dhaqanka ORS 294.305 ilaa 294.565 ama ORS 294.900 ilaa 294.930 sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogal ah.

d. Wixii shardi ah ee guddida kormeeridda iyo ilaalinta canshuurta si ay u qabtaan dhagaysi sida uu dhigayo ORS 294.640 ama 294.655 waxa raalligalin kara siinta qaab kaqaybgal ama ugu kulmid taleefanka, maqal iyo muuqaal, ama qaabab kale oo elektaroonik ah, iyo sidoo kale siinta qaabab ay u gudbiyaan wixii qoraal ah, oo uu kujiro iimeyl ama qaabab kale oo elektaroonik ah, oo guddidu u tixgaliso inay wakhtiga loogu talogalay ku dhacayaan kahor inta ayna samaynin wax diidmo ah, talo ah, caddayn ah, ama amar kusaabsan miisaaniyadda golaha deegaanka ee la soo jeediyey, cashuur gaar ah, ama bixinta dammaanadda.

e. Shuruudaha caddaynta ee ku cad ORS 221.770(1)(b) iyo (c) waxa lagu raalligalin karaa qabashada dhagaysi iyo oggolaanshaha faallo qoran iyadoo la raacayo baaragaraaf 3(a) ee Amarkan Sare, iyo iyadoo caddayn loo gudbinayo Waaxda Oregon ee Adeegyada Maamul sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogal ah marka la ansixiyo miisaaniyadda.

Amarkan Sare waxa la soosaaray iyadoo la eegayo awoodda ay Badhasaabka siiyeen ORS 401.165 to 401.236. Sida ay sheegayso ORS 401.192(1), amarada ku qoran Amarkan Sare waa inay noqdaan qaar si buuxda u dhaqangala, waana in wixii shuruuc, xeerar iyo amaro jira la hakiyo ilaa iyo xadka ay ka hor imanayaan shaqada awoodaha xaaladaha degdegga ah ee Badhasaabka.

Amarkaan Fulinta ah wuxuu dhaqan galaa isla markaaba, wuxuuna dhaqan galayaa ilaa uu ka joojiyo Barasaabka Gobolka.

Waxaa lagu sameeyay Salem, Oregon, maalintaa 15-ka Abriil, 2020.

_____

Kate Brown
GUBANATORE

CADDAYN:

_____

Bev Clarno
XOGHAYAHA ARRIMAHA DIBADDA